IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH

نشرة رسمية

## EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 16aad Muqdisho 20ka Disembar 1988 L. 1 r 12

جريدة شهرية FAAFIN BIL SOO BAXA

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar walba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka 1 aweydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

### QAYBTA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 25 ee 23 Nofembar 1988, Oggolaansho Heshiis amaaheed dhexmaray J. D. S. iyo Sanduuqa Horumarinta Islaamka. Bog; 825

### QAYBTA KOWAAD

### X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 62 ee 29 Nof. 1988, Lahaanshaha Warshad Cusub . » 826

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 63 ee 30 Nof. 1988, Magacaabid Notaayo. » 827

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 64 ee 21 Nof. 1988, Magacaabid Notaayo. » 828

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 65 ee 25 Nof. 1988, Meel marin heshiiska amaaheed ee dhexmaray JDS iyo Sanduuqa H. Is/ka. » 829

DECREE No. 65 on 25 Nof. 1988, Instrument of ratification. » 830

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 66 ee 6 Dis. 1988, Magacaabid la-taliyaha Madaxweynaha. » 831

QAYBTA SAD/XAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

MAXKAMADDA G. BANAADIR 11.10.88, Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Cali Raage Geedi L. 526 » 832

MAXKAMADDA G. SANAAG, 22.5.1988, Lumid Jeegag War. ku qoran Maxamed Xuseen Shire L. 527 » 833

MAXKAMADDA G. BANAADIR 1.12.88, Lumid 10 Jeeg War. ku qoran Siraad Cabdulle Xuseen L. 528 » 834

MAXKAMADDA G. BANAADIR 27.10.88, Lumid 4 Jeeg War. ku qoran Maxamed Axmed Xuudi L. 529 » 835

MAXKAMADDA G. BANAADIR 1.12.88, Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Jaamac Maxamed Mire L. 530 » 836

MAXKAMADDA G. BANAADIR 29.11.88, Lumid Jeeg War. L. 1176429 ku qoran Baayi Maxamed Cabdikariim L. 531 » 837

MAXKAMADDA G. BANAADIR 2.12.88, Lumid Jeeg War. L. 0048638 ku qoran Siraad Cabdulle Xuseen 532 » 838

MAXKMADDA G. BANAADIR 3.12.88, Lumid Buug Kayd L. 864/88 ku qoran Shariif Maxamed Cumar L. 533 » 839

| | | |
|---|---|---|
| MAXKAMADDA G. BANAADIR 6.12.88, Lumid Jeeg War. L. 0235411 ku qoran Somali Air Lens L. 536 | » | 840 |
| MAXKAMADDA G. BANAADIR 4.12.88 Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Aweeys Xirsi Dubad L.537 | » | 841 |
| MAXKAMADDA G. BANAADIR 8.12.88 Lumid Jeeg War. L. 0244906 ku qoran Cali Maca-lin Cabdullaahi L. 538 | » | 842 |
| MAXKAMADDA G. BANAADIR 22.6.88 Lumid 4 Jeeg War. ku qoran Cawil Cumar Cali L.539 | » | 843 |
| MAXKAMADDA G. BANAADIR 7.12.88 Lumid Jeeg War. L. 0963396 ku qoran Cabdi Aadan Maxamed L. 540 | » | 844 |
| MAXKAMADDA G. BANAADIR 5.12.88 Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Ibraahim Maxamed Cusmaan L. 541 | » | 845 |
| MAXKAMADDA G. BANAADIR, 10.12.88 Lumid Jeeg War. L. 0689631 ku qoran Axmed Yaasiin Cumar L. 542 | » | 846 |

# S H A R C I

## QAYBTA KOWAAD

Sharci lambar 25, taariikh 23.11.1988 Oggolaansho Heshiis amaaheed dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Horumarinta Islaamka: Mashruuca khudaarta.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Heshiis amaaheed oo dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya iyo Bankiga Horumarinta Islaamka, kuna saabsan amaah lacageed oo dhan D. 228.000 (Diinaarka Islaamka), una dhiganta USD 285.000 looguna talo galay Mashruuca Khudaarta beeraha ee Gobollada Waqooyi.

2. Heshiiskan waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Jeddah ee Dalka Boqortooyada Sacuudi Caraabiya taariikhdu markay ahayd 4 Dul-Xaja 1409 oo ku beegneyd 17.7.1988.

3. Heshiiskani wuxuu ka mid noqonayaa Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay tilmaamayaan Heshiiska ku tilmaaman Qod. 1aad ee Sharcigan waxaa dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya iyo qodobbada la xiriira Heshiiskan.

Qod. 3aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya waxaa awood loo siiyey inuu meelmariyo Heshiiskan.

Qod. 4aad

Sharcigan waxa uu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynuhu.

Muqdisho, 23.11.1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.

## QAYBTA LABAAD

## X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 62 ee 29 Nof. 1988 Lahaanshaha Warshadda Cusub.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad faqradda 5aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23ka Dis. 1984, kuna saabsan wax ka bedelidda Dastuurka;

MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagama maarman tahay mideynta Warshadda Cusub ee Hargaha Km. 7 iyo Wakaaladda Hargaha Soomaaliyeed.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Lahaanshaha Warshadda Cusub iyo maamulkeeda waxa si buuxda loogu wareejiyey Wakaaladda Hargaha Soomaaliyeed.

Qod. 2aad

Shirkaddii doonaysa waxay (Joint_Venture) la geli kartaa Dawladda Soomaaliyeed, iyadoo kala xaajoonayso Madaxa Wakaaladda Hargaha Soomaaliyeed, oo ayadu mas'uuliyaddaas iska leh; iyadoo la raacayo Sharciyada u degsan Dalka sida kan maalgelinta Shisheeyaha, kan wada_lahaanshaha iwm.

Qod. 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 29 Nov. 1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 64 ee 21 Nof. 1988, Magacaabid Nootaayo.-

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lr. 8 ee 15.2.1961 iyo Lr. 1 ee 2.3.1962 kuna saabsan hawsha Nootaayada;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 2aad ee Sharciga Lr. 7 ee 2.2.1986 oo awood u siinaya Madaxweynaha JDS inuu si toos ah iyo tartan la'aan u magacaabo Notaayo qofkii mudan.

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada uu soo jeediyey Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

WUXUU SOO SARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Jaalle Dr. Cusmaan Cali Weheliye waxaa loo magacaabay Notaayo, wuxuuna hawshiisa Notaayonimo ku fulinayaa magaalada Muqdisho.

Qod. 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa markii uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 21 Nov. 1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 63 ee 30 Nof. 1988 Magacaabid Notaayo.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada Lr. 8 ee 15.2.61 iyo Lr. 1 ee 2.3.62, kuna wada saabsan hawsha Nootaayada;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 2aad ee Sharciga Lr. 7 ee 2.2.1986 oo awood u siinaya Madaxweynaha JDS inuu si toos ah iyo tartan la'aan u magacaabo Notaayo qofkii mudan;

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada uu soo jeediyey Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Jaalle Dr. Maxamed Keynaan Warsame waxaa loo magacaabay Notaayo, hawshiisa Notaayonimo wuxuu ku fulinayaa magaalada Muqdisho.

Qod. 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markii uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 30 Nov. 1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lr. 65 Tr. 23.11.88, Meelmarinta Heshiiska amaaheed ee dhexmaray J.D.S. iyo Bankiga Horumarinta, Islaamka, kuna saabsan Mashruuca Tijaabada Khudaarta ee Soomaaliya.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Sharciga L. 25 Tr. 23.11.88 oo Golaha Shac

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr. 49 ee 23ka Disember 1964 kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr. Tr. 2311.88 oo Golaha Shacbiga, Guddiga Joogtada ah, uu ku oggolaaday Heshiiskanalkan ku tilmaaman.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Heshiiskan la meelmariyo.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la meelmariyay Heshiiska amaaheed ee dhexmaray Dawladda J.D.S. iyo Bankiga Horumarinta Islaamka oo lagu kala saxiixday magaalada Jeddah ee Dalka Boqortooyada Sacuudiga Taariikhdu markey ahayd 4 Dul_Xaja 1909 oo ku beegneed 17.7.88, kuna saabsan Mashruuca Tijaabada Khudaarta ee Soomaaliya.

Qodobka 2aad

Heshiiskan waxa uu ku yeelanayaa Dalka J.D.S. awood Sharci ah.

Qodobka 3aad

Xeerkani waxa uu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 23.11.1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre.

DECREE N. 65 on 23 Nov. 1988 Instrument of ratification.

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: The Article 67, Para 5 and the Article 82, Para 4 of the Constitution.

HAVING SEEN: The Law no 49 of 23 December 1984.

HAVING SEEN: The Law no of 23.11.1988 on the base of which the People's Assembly has aproved the Agreemant specified in this Decree.

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement.

HEREBY PROMULGATES

The Following Decree.

ARTICLE 1

The Technical Assistance Agreement between the Government of the Somali Democratic Republic and the Islaamic Devalopment Bank, signed at Jeddah on 4 Dul.Haja 1409 (17.7.1988) and concerning the Horticulture Pilot Project in Somalia, is hereby ratified.

ARTICLE 2

Thie Agreement shall have a force of Law in the Territory of Somali Democratic Republic.

ARTICLE 3

This Decree shall come inta force upon signature by the President of Somali Democratic Republic and shall Published in Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 23.11.1988.

THE PRESIDENT OF SDR

Mohamed Siad Barre.

Xeer Madaxweynaha JDS, L. 66 ee 6 Dis. 1988, Magacaabid La Taliyaha Madaxweynaha.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad Faqradda 9aad ee D/rka

ISAGOO TIXGELIYEY: Go'aanka Guddiga Siyaasadda T. Ahaa 7.6.88.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda:

Qodobka 1aad

Sareeye Gaas Ismaaciil Axmed Ismaaciil waxa loo magacaabay La Taliyaha Madaxweynaha.

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 6.12.1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre.

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cali Raage Geedi;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 3 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad Xamar kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 1.500.000 kuna qoran magaca J.le Xasan Siyaad Cumar sida ku cad warqadda lam. 12289 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad Xamar;

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|
| 0198651 | 500.000 | Xasan Siyaad Cumar | 3/Xamar |
| 0198654 | 500.000 | » » » | » |
| 0198650 | 500.000 | » » » | » |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh. So. 1.500.000 ku qoran magaca J.le Xasan Siyaad Cumar.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad Xamar in ay siiso J.le Cali Raage Geedi lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 1.500.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 11.10.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 526

MAXKAMADDA GOBOLKA SANAAG

Ku: Garyaqaanka Guud ee Dawladda Muqdisho
Og: B.G. & K.S. Laanta Cergaabo.
Uj: Bedelaad Jeegag Wareega Lr. 0480682.0305836 Ki smaayo.

Gudoomiyaha Maxkamadda G/Sanaag Markuu Arkay Codsiga Tr. 21.5.88, ee uu Maxkamaddaan u soo qortay J/le Maxamed Xuseen Shire, soona codsaday in loo baafiyo Jeegaga ka lumay.

MARKUU ARKAY: Waxa uu ku saabsan yahay Codsigasu.

MARKUU ARKAY: Ogeysiiska Bankiga Ganacsiga iyo Key dka L/C/Gabo sida ku cad warqadda SUM.B.G.K.S. Ceer 00097/88 ee 22.5.88, taasoo ay ku cadahay inay lumeen

J gagga War. ee kala ah: J/W. Lr. 0480682.0305836 ee 2.1.88 kuna qoreeyd lacag dhan (50.000) konton kun oo Shilin iyo magaca Ibraahim Axmed Oogle iyo J/War. Lr. 0305836 ee 9.8.87, kuna qoreeyd Lacag dhan (38.000) Sodon & Siyeed kun oo shilin iyo magaca C/Raxmaan Axmed Cabdi Jeegaggaas oo laga kala sameeyey B.G.K.S. L/C/Gabo iyo Tan Gaalkacyo siday u kala horeeyaan, kana Lumeen J/le Maxamed Xuseen Shire, lagana baa_fiyey B.G.&.K.S. L/C/Gabo Tr. 30.1.88,

MARKUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9.9.65 N/2, Lumid J/W.

WUXUU AMRAYAA

In la cusboonaysiiyo Jeegagga kala ah J/War. 0480682, Iyo J/War. Lr. 0305836, ka dib markii ay ka soo wareegto Muddo dhan 30 maalmood marka go'aanka lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Jeegagga cusub ee la samayn doono gacanta laga Saaro J/le Maxamed Xuseen Shire, ama qof isaga wakaalad Sharci ah ka sita, iyadoo la sugayo mudada kor ku xusan.

K.S. Gudoomiyaha Maxkamadda Gobolka Sanaag.
(Dr. Cumar Sh. Cali Cosoble).

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

### GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Jaalle Siraad Cabdulle Xuseen;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 10 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamo kala duwan kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 857.300 ku qoran magacyo kala duwan sida ku cad warqadda lam. 14365 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|
| 0089994 | 200 000 | Ismaaciil Jaamac Bulxan | 1/Hargeysa |
| 1153534 | 100.000 | Raaliyo Axmed Culusow | W/dhiigley |
| 1091933 | 100.000 | Xuseen Muuse Ibraahim | 1/Hargeysa |
| 1122171 | 100 000 | Cabdi Caateeye | 1/Xamar |
| 1018539 | 100 000 | Jaamac Yuusuf Sugulle | 3/Hargeysa |
| 0600761 | 100 000 | Axmed Cali | Gebiley |
| 0601998 | 50 000 | C/qaadir Maxamed Caraale | 3/Hargeysa |
| 0195600 | 50 000 | Shariif Muxdar Cali | Marka |
| 0567353 | 33 300 | Aamina Maxamed Cali | Wadajir |
| 0594396 | 24.000 | Yuusuf Ismaaciil Warsame | 3/Hargeysa |

HADDUUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanmaha kor ku qoran kuna qoran magacyada mid walba ku hor qoran.

### WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha kor ku qoran in ay siiyaan J.le Siraad Cabdulle Xuseen lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 857.300 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 1.12.1988

GUDDOOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Axmed Xuudi;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 4 Jeeg War. ee hoos ku qoran, laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamo kala duwan kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 270.000 ku qoran magacyo kala duwan sida ku cad warqadda lam. 12871 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|
| 1300199 | 100.000 | Axmed Xaashi Xasan | Gaalkacyo |
| 1281655 | 100.000 | Cabdullaahi Cali Warsame | 1/Xamar |
| 0038727 | 50.000 | Axmed Cabdiraxmaan Xasan | Jowhar |
| 729689 | 20.000 | Axmed Xaashi Xasan | Gaalkacyo |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha kor ku tilman kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 270.000 ku qoran magacyada mid walba ku hor-qoran.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha kor ku qoran in ay siiyaan J.le Maxamed Axmed Xuudi lacagta cadadeedu tahay Sh So 270 000 oo ah bedelkii Jeegagga War ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maa'mood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 27.10.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Jaamac Maxamed Mire;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 3 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 100.000 ku qoran macagyada J.le Cabdi Mataan Geelle iyo J.le Xuseen Maxamed Ibraahim sida ku cad warqadda lam. 14341 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco;

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|
| 0642203 | 50.000 | Cabdi Mataan Geelle | Burco |
| 0642154 | 30.000 | Xuseen Maxamed Ibraahim | » |
| 0012507 | 20.000 | Cabdi Mataan Geelle | » |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh. So. 100.000 kuna kala qoran Cabdi Mataan Geelle iyo Xuseen Maxamed Ibraahim.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco in ay siiso J.le Jaamac Maxamed Mire lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka harreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 1.12.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 530

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Baayi Maxamed Cabdikariim.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay J/War. Lr. 1176429 laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/laad Xamar, kuna jirto lacag dhan sh.so. 100.000 ku qoran magaca J/le Baayi Maxamed C/kariim sida ku cad warqadda Lr. 14160 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta laad Xamar.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lr. 1176429 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/laad Xamar kuna jirto lacag dhan sh.so. 100.000 ku qoran magaca J/le Beeyi Maxamed Cabdikariim.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta laad Xamar in ay siiso J/le Baayi Maxamed C/kariim Lacag Cadaddeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 20.11.88.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Axmed Xaashi.

L. 531

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Siraad Cabdulle Xuseen.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay J/War. Lr. 0048638 Laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Berbera kuna jirto Lacag dhan sh.so. 8.000 ku qoran magaca J/le Maxamed Cusmaan Cali sida ku cad Warqadda Lr. 14365 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Berbera.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lr. 0048638 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Berbera kuna jirto Lacag dhan sh.so. 8.000 ku qoran magaca J/le Maxamed Cusmaan Cali.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Berbera in ay siiso J/le Siraad Cabdulle Xuseen Lacagta ca dadeedu tahay sh.so. 8.000 oo ah bedelkii J/War. kor ku qoran markey ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 2.12.88.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 532

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qorta J/lle Shariif Maxamed Cumar.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay J/War. Lr. 864/88 Laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/1aad Xamar kuna jirto Lacag dhan sh.so. 293.827.27/= ku qoran magaca J/le Shariif Maxamed Cumar sida ku cad warqadda Lr. 864/88 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/1aad Xamar.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lr. 864/88 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/1aad Xamar kuna jirto Lacag dhan sh.so. 293.827,27/= ku qoran magaca J/le Shariif Maxamed Cumar.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Xamar in ay siiso J/le Shariif Maxamed Cumar Lacagta cadadeedu tahay sh.so. 293.827,27/= oo ah beddelkii J/War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 30 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 3.12.88.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 533

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Aweys Maxamed Nuur.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay J/War. Lr. 0023340 Laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaalliyeed L/wadajir kuna jirto lacag dhan sh.so. 500.000 ku qoran magaca J/le Mahdi Abuukar C/raxmaan sida ku cad warqadda Lr. 14492 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Wada Jir.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lr. 0023340 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Wada Jir ku na jirto Lacag dhan sh.so. 500.000 ku qoran magaca J/le Mahdi Abuukar C/raxmaan.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Wada Jir in ay siiso J/le Aweys Maxamed Nuur Lacagta cada deedu tahay sh.so. 500.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax is hortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 4.12.88.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 534

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Mowliid Cilmi Yoonis;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 3 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 300.000 ku qoran magaca J.le Mowliid Cilmi Yoonis sida ku cad warqadda lam. 14380 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco;

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|
| 1102409 | 100.000 | Mowliid Cilmi Yoonis | Burco |
| 1102410 | 100.000 | » » » | » |
| 1102411 | 100.000 | » » » | » |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh. So. 300.000 ku qoran magaca J.le Mowliid Cilmi Yoonis.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco in ay siiso J.le Mowliid Cilmi Yoonis lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 300.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 1.12.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 535

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Cali Maxamed Macalin

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay J/War. Lr. 0235411 Laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaali yeed L/4aad Xamar kuna jirto lacag dhan sh.so. 140.0000 ku qoran magaca J/le Soomaali Air Lens sida ku cad warqadda Lr. 14553 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/4aad Xamar.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lr. 0235411 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/4aad Xamar kuna jirto lacag dhan sh.so. 140.000 ku qoran magaca J.le Soomali Air Lines.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta 4aad Xamar in ay siiso J/le Cali Maxamed Macalin Lacagta cadadeedu tahay sh.so. 140.000 oo ah bedelkii J/War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 6.12.88.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 536

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Aweeys Xirsi Dubad;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg Lam. 0312290-0312291 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo kuna kala jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 iyo 35.000 ku qoran magaca Aweeys Xirsi Dubad sida ku cad warqadda lam. 14489 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee lam. 0312290-0312291 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 85.000 ku qoran magaca J.le Aweeys Xirsi Dubad.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo in in ay siiso J.le Aweeys Xirsi Dubad lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 85 000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka varayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 4.12.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 537

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Cali Macalin Cabdullaahi Xasan.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay J/War. Lr. 0244906. Laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaali yeed L/Wardhiigley kuna jirto Lacag dhan sh.so. 461.000 ku qoran magaca J/le Cali Macalin C/laahi sida ku cad warqadda Lr. 14599 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Wardhiigley.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammrotamento) J/War. Lr. 0244906 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Wardhigley kuna jirto Lacag dhan sh.so. 461.000 ku qoran magaca J/le Cali Macalin Cabdullaahi.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/W/dhigley in ay siiso J/le Cali Macalin C/laahi Lacagta cadadeedu tahay sh.so. 461.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku qoran, markey ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax is hortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 8.12.88.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 538

MAXKAMADD AGOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cawil Cumar Cali;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 4 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.G. kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh. So. 230.000 kuna qoran magaca J.le Cawil Cumar Cali sida ku cad warqadda lam. 5925 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|
| 0345559 | 100.000 | Cawil Cumar Cali | Garawe |
| 0644921 | 50.000 | » » » | » |
| 0544922 | 30.000 | » » » | » |
| 0136775 | 50.000 | » » » | Qardho |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammrotamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran oo laga sameeyey Laamaha Garawe iyo Qardho ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan gaad ahaan Sh.So. 230.000 kuna qoran magaca J.le Cawil Cumar Cali.

WAXAA LA AMRAYAA

Laamaha kor ku tilmaaman ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiyaan J.le Cawil Cumar Cali lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 230.000 oo ku qoran Jeegagga War. oo kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 22.6.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdi Aadan Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0963396 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta B/weyne kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 ku qoran magaca J.le Cabdi Aadan Maxamed sida ku cad warqadda lambar 11532 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta B/weyne;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0963396 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Beled-weyne kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 ku qoran magaca J.le Cabdi Aadan Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Beled-weyne in ay siiso J.le Cabdi Aadan Maxamed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 7.12.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 540

MAXKAMADDA GOBOLK ABANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Ibraahim Maxamed Cusmaan;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. lam. 1034336-1034337 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Berbera kuna jirto lacag dhan Sh. dka Soomaaliyeed Laanta Berbera kuna kala jirto lacag dhan min Sh. So. 100.000 ku qoran magaca J.le Ibraahim Maxamed Cusmaan sida ku cad warqadda lam. 14521 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Berbera;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee lam. 1034336-1034337 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Berbera kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh. Sh. 200.000 ku qoran magaca J.le Ibraahim Maxamed Cusmaan.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Berbera in ay siiso J.le Ibraahim Maxamed Cusmaan lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 200.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 5.12.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 541

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Ismaaciil Axmed Yaasiin Cumar;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0689631 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh. So. 50.000 ku qoran magaca J.le Axmed Yaasiin Cumar sida ku cad warqadda lam. 14681 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0689631 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 ku qoran magaca J.le Axmed Yaasiin Cumar.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso J.le Ismaaciil Axmed Yaasiin Cumar lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 50.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran, markay k asoo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta k ahorreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 10.12.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 542